# Suurat Al-Israa' سُورَةُ الإِسْرَاءِ

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

سُبْحَٰنَ ٱلَّذِىٓ أَسْرَىٰ بِعَبْدِهِۦ لَيْلًا مِّنَ ٱلْمَسْجِدِ ٱلْحَرَامِ إِلَى ٱلْمَسْجِدِ ٱلْأَقْصَا ٱلَّذِى بَٰرَكْنَا حَوْلَهُۥ لِنُرِيَهُۥ مِنْ ءَايَٰتِنَآ ۚ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْبَصِيرُ ﴿١﴾

1. waxa Nasahan (Ceeb ka fog) Eebaha ka guuriyey Addoonkiisa (Nabiga) Habeen masaajidka Xurmada leh (Maka) xagga Masjidkii Aqsa een barakaynay Gaararkiisa inaan Tusinno Nabiga Aayaadkanaga Eebana waa maqle arka.

وَءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ وَجَعَلْنَٰهُ هُدًى لِّبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ أَلَّا تَتَّخِذُوا۟ مِن دُونِى وَكِيلًا ﴿٢﴾

2. waxaana siinnay Nabi Muuse kitaabkii (Tawreed) waxaana uga yeellay hanuun BaniiIsraa'iil inaydaan ka yeelanin wax iga soo hadhay Wakiil.

ذُرِّيَّةَ مَنْ حَمَلْنَا مَعَ نُوحٍ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَبْدًا شَكُورًا ﴿٣﴾

3. faricii kuwaan la xambaarnay Nabi Nuux, wuxuuna ahaa Addoon (Eebe) ee Shugri badan.

Eebe isagaa Adduun iyo Aakhiro iyo waxa dhexjoogaba Abuuray, cid abuurka kula murmina ma jirto, suu doono yuuna ugu Tasarrufaa una maamulaa, wuxuna Nabigiisii Muxamed ahaa (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka dheelmay kana Guuriyey Maka una guuriyey xagga Masaajidka Aqsa ee isna barakaysan, si Eebe u tusiyo Nicmooyinka Eebe, illeen Eebaa wax walbana maqla arkanee, waxaana ku sugnaaday xaqnimada arrintaas Xadiithyo badan waxaana ka mida xadiithka dheer ee Bukhaari wariyey ee ah: Anas Binu Maalig wuxuu yidhi: Habeen laga guuriyey Rasuulka Masaajidka kacbada oy u yimaadeen saddex Ruux, waana xadiith ka warramaya wuxuu arkay Nabigu habeenka. Bayhaqina wuxuu wariyey in Nabigu uu arkay Nuur, Imaam Axmedna isna wuxuu weriyey xadiith ku saabsan xaalkan, waxayna sugi in Nabiga Maka laga dheelmay oo Qudsi loo dheelmay, in samada loo koriyey, inuu Nabiyadii la kulmay, in Salaadda la soo faray, inuu arkay dad badan oo la ciqaabi, sida kuwa salaadda ka cuslaaday, khamrada caba, xaaraanta cuna, Zinaysta, wax xanta, xaqa u hoggaansamin, iyo kuwo kale, wuxuuna arkay Jannadii iyo Naartii,Eebana wuu sharrifay Nabigiisa, sidaas daraadeed waa in si dhaba loo rumeeyo guurinta Nabiga iyo koridiisa cirka iyo waxyaalaha la faray iyo wuxuu arkay, waxaana shakin amma beenin Munaafiq iyo Gaalo, waa in lagu adkaado Diinta Eebe halkaas Nabiga ugeeyey gaar ahaan Salaadda, xumaantana laga fogaado, ciddii doonta inay warbadan ka ogaato arrintan ha akhrido tafsiirka Aayadda, Aayadaha kale waxay ka warrami inuu Eebe Nabi Muuse siiyey Kitaabkii Tawreed., ee hanuuninaayey Banii Israa'iil ugana digaayey inayna wakiil ka dhiganayn wax Eebe ka soo hadhay, illeen waa faricii cidduu Eebe la koriyey Nabi Nuuxe, wuxuuna ahaa addoon mahadnaq badan, waana inay xusuustaan Nicmadaas xaqana ku toosnaadaan,Eebana si dhaba u caabudaan una aqoonsadaan, haddii kale dulli iyo ciqaab. Ibnu Kathiir wuxuu yidhi: xadiithka dheelminta waxaa wariyey Anas, Cumar Binu Khadhaab,Cali Ibnu Mascuud,Abii dar, Abii Hureere, Maalig Binu sacsacata, Abii Saciid Ibnu Cabbaas, Shaddaad, Ubayi'Ibnu Camar, Jaabir, Abii Ayuub, xudeefe'Abii umaama, Samurra,Suhayb, Umu haani, Caa'isho iyo Asmo. Al-Israa' (1-3).

4. Waxaan ku (Ogaysiinnay) ugu Waxyoonay Banii Israa'iil Kitaabka (Tawreed) inaad fasaadinaysaan Dhulka Labo Jeer, isna kibrinaysaan iskibrin Wayn.

وَقَضَيْنَآ إِلَىٰ بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ فِى ٱلْكِتَٰبِ لَتُفْسِدُنَّ
فِى ٱلْأَرْضِ مَرَّتَيْنِ وَلَتَعْلُنَّ عُلُوًّا كَبِيرًا ﴿٤﴾

5. Markuu yimaaddo Yabooha (Waqtiga) midda hore waxaan idinku soo Bixinaa «Dirraa» Addoomadanada oo Xoog daran leh, dhexgalina (Hanan) Guryaha dhexdooda waana Yabooh la fali.

فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ أُولَىٰهُمَا بَعَثْنَا عَلَيْكُمْ عِبَادًا لَّنَآ أُو۟لِى
بَأْسٍ شَدِيدٍ فَجَاسُوا۟ خِلَٰلَ ٱلدِّيَارِ ۚ
وَكَانَ وَعْدًا مَّفْعُولًا ﴿٥﴾

6. Markaasaan idinku soo Celinaa Dawladnimada, idinkuna Xoogaynaa Xoolo iyo Caruur idinkana yeellaa kuwa Tiro badan.

ثُمَّ رَدَدْنَا لَكُمُ ٱلْكَرَّةَ عَلَيْهِمْ وَأَمْدَدْنَٰكُم
بِأَمْوَٰلٍ وَبَنِينَ وَجَعَلْنَٰكُمْ أَكْثَرَ نَفِيرًا ﴿٦﴾

7. Haddaad Samo Fashaan waxaad u samo fasheen Naftiinna, haddaad Xumaan fashaanna waa uun Naftiinna, markuu Yimaaddo Yabooha Dambana way Xumeeyaan Wajigiinna iyo inay Galaan Masaajidka (Baytul Maqdis) siday u galeen markii hore iyo inay Damiraan «Tirtiraan» waxay u Adkaadaan Tirtirid.

إِنْ أَحْسَنتُمْ أَحْسَنتُمْ لِأَنفُسِكُمْ ۖ وَإِنْ أَسَأْتُمْ فَلَهَا ۚ
فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ ٱلْءَاخِرَةِ لِيَسُۥٓـُٔوا۟ وُجُوهَكُمْ
وَلِيَدْخُلُوا۟ ٱلْمَسْجِدَ كَمَا دَخَلُوهُ أَوَّلَ مَرَّةٍ
وَلِيُتَبِّرُوا۟ مَا عَلَوْا۟ تَتْبِيرًا ﴿٧﴾

8. Waxay u Dhawdahay in Eebihiin idiin Naxariisto, haddaad ku Noqotaanna waannu ku noqon, waxaana uga yeelnay Jahannamo Gaalada Gogol.

عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يَرْحَمَكُمْ ۚ وَإِنْ عُدتُّمْ عُدْنَا ۘ وَجَعَلْنَا جَهَنَّمَ
لِلْكَٰفِرِينَ حَصِيرًا ﴿٨﴾

Aayadahanna wuxuu Eebe kaga warrami Xaalka Banii Israa'iil iyo inay Fasaadin Dhulka Labo Jeer aadna isula waynan, isuna Kibrin, markaas Labada Jeerba lagu diri Addoomo Eebe oo Daran Dhulkana ka Dhex geli kana qabsan, Ciqaab iyo Halaagna Dhadhansiin, hadday Wanaag Falaanna waa uun Naftooda hadday Xumaan falaanna waa Dhibka Naftooda, wuxuuna Eebe sugay in Marka Dambe Masjidka Qudsi Loogu gali Xumaan iyo Xanuuna ay la kulmi, Naxariista Eebase way u Furantahay Ciddii Eebe u Noqon oo Toobad Keeni, haddayse Xumaanta ku Noqdaan Eebana wuxuu ku Noqon Ciqaabtooda iyo Abaal marintooda, Jahannamana waa Gogosha Gaalada, waxbadan yey Culimadu ka hadleen Arrintaas laakiin Eebaa og inay tegtay iyo inay Dhimantahay. Maxaa diidi haddii lagu Ciqaabo Gacmaha Muslimiinta Qudsina laga soo Celiyo. Al-Israa' (4-8).

---

9. Quraankanna wuxuu ku Hanuunin Dadka Arrinta u Toosan ugana Bishaarayn kuwa fala Wanaag inay Mudan Ajir wayn,.

إِنَّ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانَ يَهْدِى لِلَّتِى هِىَ أَقْوَمُ وَيُبَشِّرُ
ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
أَنَّ لَهُمْ أَجْرًا كَبِيرًا ﴿٩﴾

10. Kuwaan Rumeynin Aakhirana waxaan u Darabnay Cadaab Daran.

وَأَنَّ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ أَعْتَدْنَا لَهُمْ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٠﴾

11. Wuxuu u Yeedhaa (Baryaa) Dadku Shar siduu ugu Yeedho «Baryo» Khayrka,Dadkuna waa Deg dege.

وَيَدْعُ الْإِنسَانُ بِالشَّرِّ دُعَاءَهُ بِالْخَيْرِ وَكَانَ
الْإِنسَانُ عَجُولًا ﴿١١﴾

12. Waxaan ka Yeellay Habeenka iyo Maalinta Labo Calaamo, waxaana Tirraa Calaamada Habeenka, waxaana ka Yeellaa Calaamada Maalinta mid wax Tusisa (Arag) inaad doontaan Fadliga Eebihiin iyo inaad ku ogaataan Tirada Sanooyinka iyo Xisaabta, wax kastana waxaannu u Caddeynay Caddayn (aada).

وَجَعَلْنَا اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ آيَتَيْنِ فَمَحَوْنَا آيَةَ اللَّيْلِ
وَجَعَلْنَا آيَةَ النَّهَارِ مُبْصِرَةً لِتَبْتَغُوا فَضْلًا
مِن رَبِّكُمْ وَلِتَعْلَمُوا عَدَدَ السِّنِينَ وَالْحِسَابَ
وَكُلَّ شَيْءٍ فَصَّلْنَاهُ تَفْصِيلًا ﴿١٢﴾

13. Ruux kasta waxaan Laasiminay Camalkiisa (loo Qaddaray) Luquntiisa, waxaana u soo bixinnaa Maalinta Qiyaame Kitaab uu la kulmi Isagoo fidsan.

وَكُلَّ إِنسَانٍ أَلْزَمْنَاهُ طَائِرَهُ فِي عُنُقِهِ وَنُخْرِجُ لَهُ
يَوْمَ الْقِيَامَةِ كِتَابًا يَلْقَاهُ مَنشُورًا ﴿١٣﴾

14. Laguna Dhihi akhri Kitaabkaaga isagaa kuugu Filan Maanta Korkaaga Xisaabe.

اقْرَأْ كِتَابَكَ كَفَىٰ بِنَفْسِكَ الْيَوْمَ عَلَيْكَ حَسِيبًا ﴿١٤﴾

Quraankuna wuxuu ku Toosin Dadka Arrinta ugu Toosan uguna Fiican xagga Caqiidada, Xukunka, Akhlaaqda, Macaamilada iyo wax kasta oo Wanaag lagu gaadho Adduun iyo Aakhiraba, wuxuuna ugu Bishaarayn Mu'miniinta Wanaaga fala Ajir wayn,kuwaan Eebe iyo Aakhiro Rumaynna Cadaab daran in loo darbay, tan kale Dadku wuu Degdegaa isagoo shar iyo Balaayo Baryi sida Khayrka iyo Wanaagga, waxaana Xadiitha: Ha habaarina Naftiinna iyo Xoolihiinna waxaa laga yaabaa inaad ka waafaqdaan Eebe Saacad la Ajiibo oo laydin Ajiibo. Eebana wuxuu ka yeelay Habeenka iyo Maalinta Calaamad ku tusin Qudradiisa, iyo inay Xasilaan Habeenkii, una socdaan Maalintii shaqo iyo Sanco iyo Camal iyo Safar, kuna Ogaadaan Ayaamaha, Jumcooyinka, Bilaha iyo Sanooyinka, Wuxuuna Eebe caddeeyey wax kastoo loo baahanyahay, ruux kastana waxaa laasimi oo laxidhiidhi Camalkiisa, Qiyaamadana waxaa loo soo Bixin Kitaab uu la Kulmo isagoo Fidsan, laguna dhihi Akhri Kitaabkaaga iyo Xaashidaada kuugu filan Maanta Xisaabe, saas darteed mar haddaan haysanno Quraankana wanaagga ku Toosin waa inaan Qabsannaa oon Raacnaa kuna fara adaygnaa. Al-Israa' (9-14).

---

15. Ruuxii Hanuuna wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa kii Dhumana wuxuu uun u Dhumay Naftiisa, mana xambaarto Nafi Dambi Naf kale, mana Cadaabno intaan uga soo Dirro Rasuul.

مَنِ اهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدِي لِنَفْسِهِ وَمَن ضَلَّ
فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَىٰ
وَمَا كُنَّا مُعَذِّبِينَ حَتَّىٰ نَبْعَثَ رَسُولًا ﴿١٥﴾

16. Markaan doono inaan Halaagno Qaryad waxaan farraa kuweeda loo Nicmeeyey «Khayr» markaasay ka Faasiqoobaan waxaaana ku sugnaada

وَإِذَا أَرَدْنَا أَن نُّهْلِكَ قَرْيَةً أَمَرْنَا مُتْرَفِيهَا فَفَسَقُوا فِيهَا

Ciqaab waana Tirtirraa Tirtirid (Halaag).

فَحَقَّ عَلَيْهَا ٱلْقَوْلُ فَدَمَّرْنَٰهَا تَدْمِيرًا (١٦)

17. Imisaan Halaagnay Quruun (Nabi) Nuux ka dib Eebahaabaana ugu filan Dambiyada Addoomadiisa Ogaade Arka.

وَكَمْ أَهْلَكْنَا مِنَ ٱلْقُرُونِ مِنۢ بَعْدِ نُوحٍ ۗ وَكَفَىٰ بِرَبِّكَ
بِذُنُوبِ عِبَادِهِۦ خَبِيرًۢا بَصِيرًا (١٧)

18. Ruuxii dooni Adduunyo waan ugu soo dedejinaa dhexdeeda waxaan Doonno Ciddaan doonno, markaasaan kayeellaa Jahannamo mid gala isagoo Caayan oo Dullaysan.

مَّن كَانَ يُرِيدُ ٱلْعَاجِلَةَ عَجَّلْنَا لَهُۥ فِيهَا مَا نَشَآءُ
لِمَن نُّرِيدُ ثُمَّ جَعَلْنَا لَهُۥ جَهَنَّمَ يَصْلَىٰهَا مَذْمُومًا
مَّدْحُورًا (١٨)

19. Ciddiise Doonta Aakhiro oo u fala camalkeedii isagoo Mu'mina kuwaas Camalkoodu wuxuu Noqon mid la Mahdiyo.

وَمَنْ أَرَادَ ٱلْـَٔاخِرَةَ وَسَعَىٰ لَهَا سَعْيَهَا وَهُوَ مُؤْمِنٌ
فَأُو۟لَٰٓئِكَ كَانَ سَعْيُهُم مَّشْكُورًا (١٩)

Ciddii Hanuunta wuxuu uun wax u taray Naftiisa, tii dhuntana waxay uun Dhibtay Nafteeda, Nafna ma Qaaddo dambi Naf kale, Eebana Dadka ma Cadaabo isagoon u soo Dirin Rasuul Xaqa u caddeeya oo Tusiya Jidka Toosan, markii Eebe Halaagi Magaalo ama Umadna waxaa xaqa iyo Wanaagga diida oo ka Faasiqooba kuwa Xoolaha loogu Nicmeeyey iyo kuwo xun oo Madax ah, Markaasay Ciqaabtii Eebe ku Dhacdaa, lana Halaagaa halaag Dhaba, in badan yuuna Eebe halaagay Quruumo Nabi Nuux ka dib, Eebana Ogaansho iyo Arkid ugu filan Dambiyada Addoomadiisa, ciddii Jecel oo Camalkiisa la dooni adduunyo iyo Dhalanteedka, wuxuu Eebe ka siiyaa wax Cidduu doono wuxuu doono, markaasuu galiyaa Jahannamo isagoo caayan oo Dullaysan, ciddiise Doonta Aakhiro oo u Camal fasha isagoo Mu'min Xaqa Rumeeyey ah kaasi waa mid la Mahdiyo Camalkiisa, Taasina waxay ku tusin in Naf walba iyadu Masuulka Koobaad iska tahay Nacfi iyo Dhiba, Xumaanta ku kibirka, Xoolaha iyo Ladnaanta iyo awoodda iyo inay Ciqaab sabab u Noqon, inaan Eebe Ciqaabin Dadka isagoon Xaqa u caddayn, in Umado badan la halaagay Nabi Nuux ka dib, Adduunyo uun Ruuxii doonana wuxuu ka heli wuxuu Eebe doono, waxaana u Dambayn Naar isagoo Caayan oo Dullaysan, Ruuxiise la Doona Camalkiisa aakhiro camalna u fala isagoo Mu'min ah oo Raaci Nabiga Camalkiisa iyo Islaamka, wuu mahdin Camalkiisa lana mahdin, adduunyadana in kastooy xaq tahay in xalaasha si fiican looga doono haddana ma aha in laga dabo dhaco oo lagu waasho Xalaal iyo Xaaraan.
Waxaa xadiith ah: adduunku waa Guri cidaan Guri lahayn iyo Xoolo Ruuxaan xoolo lahayn, waxaana u kulmiya cidaan Caqli lahayn. Al-Israa' (15-19).

---

20. Dhammaan waxbaan uga Fidinaa kuwaas (Doona Adduun) iyo kuwaas (Doona aakhiro) siismada Eebahaa, mana aha siismada Eebahaa mid Reeban.

كُلًّا نُّمِدُّ هَٰٓؤُلَآءِ وَهَٰٓؤُلَآءِ مِنْ عَطَآءِ رَبِّكَ ۚ
وَمَا كَانَ عَطَآءُ رَبِّكَ مَحْظُورًا (٢٠)

21. Day sidaan uga Fadilnay qaarkood qaarka (Kale) (Addunka) Aakharaase wayn darajooyin oo wayn Fadilid.

ٱنظُرْ كَيْفَ فَضَّلْنَا بَعْضَهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ وَلَلْـَٔاخِرَةُ
أَكْبَرُ دَرَجَٰتٍ وَأَكْبَرُ تَفْضِيلًا (٢١)

22. Ha Yeelin Eebe Miciisa Ilaah kale ood noqotid mid Caayan oo la Khasaariyo.

لَّا تَجْعَلْ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَتَقْعُدَ مَذْمُومًا
مَّخْذُولًا (٢٢)

23. Wuxuu Faray Eebahaa inaydaan Caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan Labadii Waalid Samo falid, hadduu ku gaadho Agtaada wayni midkood ama Labaduba ha ku Dhihin uf, hana Canaanan una dheh hadal Fiican.

۞ وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوٓا۟ إِلَّآ إِيَّاهُ وَبِٱلْوَٰلِدَيْنِ
إِحْسَٰنًا ۚ إِمَّا يَبْلُغَنَّ عِندَكَ ٱلْكِبَرَ أَحَدُهُمَآ
أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُل لَّهُمَآ أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا
وَقُل لَّهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا ﴿٢٣﴾

24. Una Raarici (Jilci) Garab Naxariiseed (u Naxariiso) dhehna Eebow ugu Naxariiso siday ii Koriyeen anoo Yar.

وَٱخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ ٱلذُّلِّ مِنَ ٱلرَّحْمَةِ
وَقُل رَّبِّ ٱرْحَمْهُمَا كَمَا رَبَّيَانِى صَغِيرًا ﴿٢٤﴾

25. Eebihiin wuu ogyahay waxa Natiinna ku Sugan, haddaad Suubantihiin isagu kuwa Toobad keenka badan wuu u Dhaafaa «Dambiga».

رَّبُّكُمْ أَعْلَمُ بِمَا فِى نُفُوسِكُمْ ۚ إِن تَكُونُوا۟ صَٰلِحِينَ
فَإِنَّهُۥ كَانَ لِلْأَوَّٰبِينَ غَفُورًا ﴿٢٥﴾

Cid walba Eebe wuu ka siin adduunka wuxuu doono Eebe cidnana kama reebana Deeqda Adduun ee Eebe, waana lagu kala Duwanyahay, Adduunka mid Xoolo leh mid Saboola, mid Fayow mid Buka iyo waxyaale kale, Aakharaase darajo wayn oo Fadli badan, sida Xadiith ku Sugnaaday in Dadka Darajooyinka sare ay u Arki kuwa kale sida xiddiga Jahada Cirka. waana in Eebe kaliya la Caabudo oon Ilaah kale Loo yeelin si uusan Ruuxu u noqon mid Caayan, oo Khasaara, Eebana wuxuu Xukumay in Isaga kaliya la Caabudo, Labada Waalidna loo samo falo, haddii midkood ama Labadubana Agtaada ku Da'oobaan ha Nicin oo Karaahiyeysan, hana ku dhihin hadal xun sida Uf iyo wixii la mida hana Canaanan, hadal fiicanna u dheh, una Naxariiso, Eebana ka bari inuu u Naxariisto siday kuugu Naxariisteen kuuna Koriyeen Yaraantaadii, Eebana wuu ogyahay waxa naftiinna ku sugan, haddaad wanaagsantihiinna Eebaa u dambi dhaafaa kuwa u Toobad keena, Bal day sida islaamku u wayneeyey xaqa Waalidka,Diintee iyo nadaamkee laga heli Naxariistaa iyo Qaddarintaa inta lala xidhiidhiyey xaqa Eebe, saas darteed waa in si dhaba loo garto Islaamka looguna Dhaqmo, waalidkana loo Ixtiraamo loona naxariisto, waxaana Xadiithyo badan ku sugnaaday Addeecidda Waalidka iyo Xumaanta Caasigooda sida ruuxii soo Gaadha Labadiisii Waalid ama midkood oo Naar gala,Eebe ha ku fogeeyo (Abuu Daa'uud) iyo Jannadu Lugta Hooyaday ku Hoos Jirtaa, (Imaam Axmed) aaway kuwa ku qaylyi u roonida haweenka, mase waa sawaxan aan riiqid lahayn iyo Been cad. Al-Israa' (20-25).

---

26. Sii qaraabada xaqeeda iyo Miskiinka iyo socdaalka hana ku xadgudbin bixin Xadgudub (iyo si xun).

وَءَاتِ ذَا ٱلْقُرْبَىٰ حَقَّهُۥ وَٱلْمِسْكِينَ وَٱبْنَ ٱلسَّبِيلِ
وَلَا تُبَذِّرْ تَبْذِيرًا ﴿٢٦﴾

27. illeen kuwa ku xadgudba waa walaalo Shaydaane, Shaydaanna Eebihiis wuu ka gaaloobay.

إِنَّ ٱلْمُبَذِّرِينَ كَانُوٓا۟ إِخْوَٰنَ ٱلشَّيَٰطِينِ ۖ
وَكَانَ ٱلشَّيْطَٰنُ لِرَبِّهِۦ كَفُورًا ﴿٢٧﴾

28. haddaad ka jeedsato xaggooda (wax la'aan) adoo rajayn Naxariista Eebahaa ood rajayn waxaad ku dhahdaa hadal fudud (fiican).

وَإِمَّا تُعْرِضَنَّ عَنْهُمُ ٱبْتِغَآءَ رَحْمَةٍ مِّن رَّبِّكَ تَرْجُوهَا
فَقُل لَّهُمْ قَوْلًا مَّيْسُورًا ﴿٢٨﴾

29. ha ka yeelin gacantaada mid ku xidhan Luquntaada hana wada fidin dhammaan ood noqoto mid la dagaalo oo tabar gaba.

وَلَا تَجْعَلْ يَدَكَ مَغْلُولَةً إِلَىٰ عُنُقِكَ وَلَا تَبْسُطْهَا
كُلَّ ٱلْبَسْطِ فَتَقْعُدَ مَلُومًا مَّحْسُورًا ﴿٢٩﴾

إِنَّ رَبَّكَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ وَيَقْدِرُ
إِنَّهُۥ كَانَ بِعِبَادِهِۦ خَبِيرًۢا بَصِيرًا ﴿٣٠﴾

30. Eebahaa wuu u fidiyaa Risqiga cidduu doono wuuna u qaddaraa «cidhiidhyaa» (cidduu doono) illeen Eebe Addoomadiisa waa oge arkee.

وَلَا تَقْتُلُوٓا۟ أَوْلَٰدَكُمْ خَشْيَةَ إِمْلَٰقٍ ۖ نَّحْنُ نَرْزُقُهُمْ
وَإِيَّاكُمْ ۚ إِنَّ قَتْلَهُمْ كَانَ خِطْـًٔا كَبِيرًا ﴿٣١﴾

31. ha Dilina Carruurtiinna ka Cabsi Faqri (Saboolnimo) anagaa Arsaaqayna iyaga iyo idinkaba Dilkooduna waa Gaf wayn.

**Qaraabada, Masaakiinta iyo Musaafirkaba waa in la xidhiidhiyo waxna la siiyo, lana xadgudbin ee si fiican wax loo Bixiyo, illeen mubadar waa Walaal Shaydaane, Shaydaan waa mid Eebe ka Gaalooba, haddaadan wax hayna Hadal fudud oo fiican ku dheh, waxaana xadiith ah: Ruuxii jecel in loo waasiciyo Risqiga cimrigana loo dheereeyo ha xidhidhiyo Qaraabadiisa. waana in wax bixintu dhexdhexaad ahaato, oodan Gacanta Luqunta ku xidhin Bakhaylnimo, wada fidinna oo lagu Naco, ama fadhiisatid illeen Risqigana Eebaa haya oo u fidiya cidduu doono una qaddara tuu doono imtixaan, wuuna ogyahay Addoomadiisa iyo Maslaxadooda, waase in wax la bixiyo oo la sadaqaysto. Abuuhurayre wuxuu ka wariyay Rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Subax kasta oo addoomuhu soo Toosaan waxaa dhawaaqi Labo Malag oo mid dhihi Eebow wax bixiye badel sii, kan kalana dhihi Eebow hayste halaag sii. «waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim».**
**Tan kale waa inaan la layn Carruurta siday falayeen Jaahiliintu iyagoo Faqri ka yaabi illeen Eebaa dhammaan arsaaqee, Dilkooduna waa gaf wayn oo xune, waana dambi daran oo adag sida cad. Al-Israa' (26-31).**

---

وَلَا تَقْرَبُوا۟ ٱلزِّنَىٰٓ ۖ إِنَّهُۥ كَانَ فَٰحِشَةً وَسَآءَ
سَبِيلًا ﴿٣٢﴾

32. Ha u dhawaanina sino Illeen waa xumaane Waddana u xune.

وَلَا تَقْتُلُوا۟ ٱلنَّفْسَ ٱلَّتِى حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلْحَقِّ ۗ
وَمَن قُتِلَ مَظْلُومًا فَقَدْ جَعَلْنَا لِوَلِيِّهِۦ سُلْطَٰنًا
فَلَا يُسْرِف فِّى ٱلْقَتْلِ ۖ إِنَّهُۥ كَانَ مَنصُورًا ﴿٣٣﴾

33. Hana dilina Nafta Eebe xarrimay Xaq Mooyee, Ruuxii lagu dilo Gardarro waxaan U yeellay waligiisa Xujo ee yuusan ku xad gudbin Dilka waa loo Gargaaraye.

وَلَا تَقْرَبُوا۟ مَالَ ٱلْيَتِيمِ إِلَّا بِٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ حَتَّىٰ يَبْلُغَ
أَشُدَّهُۥ ۚ وَأَوْفُوا۟ بِٱلْعَهْدِ ۖ إِنَّ ٱلْعَهْدَ كَانَ
مَسْـُٔولًا ﴿٣٤﴾

34. Hana u dhawaanina Xoolaha agoonta sida U fiican mooyee intay ka gaadhaan xooggooda, Oofiyana ballanka illeen Ballanka waa lays warsane.

وَأَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ إِذَا كِلْتُمْ وَزِنُوا۟ بِٱلْقِسْطَاسِ ٱلْمُسْتَقِيمِ ۚ
ذَٰلِكَ خَيْرٌ وَأَحْسَنُ تَأْوِيلًا ﴿٣٥﴾

35. Oofiyana kaylka «beegidda» markaad beegaysaan kuna miisama Miisaan toosan (caadila) Saasaa khayr roon oo Fiican cidhibe.

وَلَا تَقْفُ مَا لَيْسَ لَكَ بِهِۦ عِلْمٌ ۚ إِنَّ ٱلسَّمْعَ وَٱلْبَصَرَ
وَٱلْفُؤَادَ كُلُّ أُو۟لَٰٓئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْـُٔولًا ﴿٣٦﴾

36. hana dhihin (Raacraacin) Waxaadan u Cilmi lahayn, Illeen Maqalka, Araga iyo Qalbigaba waa lays warsane.

وَلَا تَمْشِ فِى ٱلْأَرْضِ مَرَحًا ۖ إِنَّكَ لَن تَخْرِقَ ٱلْأَرْضَ
وَلَن تَبْلُغَ ٱلْجِبَالَ طُولًا ﴿٣٧﴾

37. Hana u soconin Dhulka kibir Illeen ma Jeexi Kartid Dhulka kumana gaadhaysid Buuraha dherare.

38. Dhammaan waxaasna Xumaantiisu Eebahaa Agtiisa waa lagu Neceb yahay.

كُلُّ ذَٰلِكَ كَانَ سَيِّئُهُۥ عِندَ رَبِّكَ مَكْرُوهًا ﴿٣٨﴾

Zinadu waa dulli, Xaaraan iyo Halaag, waana in laga fogaado, Illeen Danbi ka wayn Zino gaalnimo mooyee ma Jiree, Sida Nabigu yidhi, Sidoo kale waa inaan xaq darro Naf lagu Dilin. Sunan waxaa ku sugnaaday (Xadiith) Adduunkoo rogmada yaa ka fudud Eebe agtiisa naf Muslim ah dilkeed. Cidda waliga u ah Ruuxa la dilana yuusan ku xadgubin Qisaasta, Illeen waa loo gargaaraye, Xoolaha agoontana waa inaan loogu Dhawaanin waxaan wanaag ahayn intay ka xoogaystaan illeen Cuniddoodu waa Naare, Waana in Ballanka la oofiyo, illen wa lays warsane, Kaylka beegidda iyo miisaankana la oofiyaa si Fiican oo toosanna loo Sameeyaa illeen saasaa fiican oo Cidhib roone, waana inaan la sheegin Waxaan loo cilmi lahayn, illeen Maqalka, Araga iyo Qalbigaba waa lays warsane, Tan kale waa inaan dhulka, Eebe isla wayni iyo kibir lagu Soconin, Maxaa faa'iida ah oo ku jira mar hadaadan Dhulka duleelinayn Ama buuraha dherer ku gaarayn, illeen Miskiin baa tahay hays dhibin Si habsanna u soco, waadna u jeedaa Aayadahan waxa ku sugan waxaase Loo baahan yahay in la raaco dardaaranka. Al-Israa' (32-38).

---

39. Arrintaasu waa waxa Eebahaa kuu waxyooday oo xigmada, hana yeelin Eebe la jirkiisa Ilaah kale oo lagugu tuuro Jahannamo adoo lagu dagaalay oo lagu fogeeyey.

ذَٰلِكَ مِمَّآ أَوْحَىٰٓ إِلَيْكَ رَبُّكَ مِنَ ٱلْحِكْمَةِ ۗ وَلَا تَجْعَلْ
مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ فَتُلْقَىٰ فِى جَهَنَّمَ مَلُومًا مَّدْحُورًا ﴿٣٩﴾

40. ma wuxuu idiin doortay Eebihiin Wiilal oos ka yeeshay Malaa'igta gabdho idinku waxaad ku hadlaysaan hadal wayn.

أَفَأَصْفَىٰكُمْ رَبُّكُم بِٱلْبَنِينَ وَٱتَّخَذَ مِنَ ٱلْمَلَٰٓئِكَةِ
إِنَٰثًا ۚ إِنَّكُمْ لَتَقُولُونَ قَوْلًا عَظِيمًا ﴿٤٠﴾

41. dhab ahaan waan ku caddaynay (gagadinay) Quraankan (wax badan) inay waantoobaan umase kordhin waxaan carar ahayn.

وَلَقَدْ صَرَّفْنَا فِى هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ لِيَذَّكَّرُوا۟ وَمَا يَزِيدُهُمْ
إِلَّا نُفُورًا ﴿٤١﴾

42. waxaad dhahdaa hadduu la jiro Eebe Ilaah kale siday sheegi waxay ka dooni lahaayeen Eebaha Carshiga leh jid (Cibaado ama la mid noqosho).

قُل لَّوْ كَانَ مَعَهُۥٓ ءَالِهَةٌ كَمَا يَقُولُونَ
إِذًا لَّٱبْتَغَوْا۟ إِلَىٰ ذِى ٱلْعَرْشِ سَبِيلًا ﴿٤٢﴾

43. Eebaa ka Nasahan Kana Sarreeya waxay sheegi sarrayn wayn.

سُبْحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ عَمَّا يَقُولُونَ عُلُوًّا كَبِيرًا ﴿٤٣﴾

44. waxaa u tasbiixsada (Qaddariya) Eebe Samooyinka todobada ah iyo Dhulka iyo waxa u dhexeeya, waxaan Eebe u Tasbiixsanayn ama ku mah-

تُسَبِّحُ لَهُ ٱلسَّمَٰوَٰتُ ٱلسَّبْعُ وَٱلْأَرْضُ وَمَن فِيهِنَّ ۚ
وَإِن مِّن شَىْءٍ إِلَّا يُسَبِّحُ بِحَمْدِهِۦ وَلَٰكِن لَّا تَفْقَهُونَ

تَسْبِيحَهُمْ ۗ إِنَّهُۥ كَانَ حَلِيمًا غَفُورًا ﴿٤٤﴾

dinayna ma jiro, waydaanse garanayn tasbiixdooda, Eebana waa dulsame dambi dhaafa.

**Waxaas wanaagsan ee Eebe faray iyo waxyaalaha xun ee uu Reebay waa waxa Eebe u waxyooday Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) tan kale waa inaan Ilaahay cid kale lala caabudin wuxuu mudanyahayna la siinin,oo ciddii saas yeeshaa lagu tuuri Jahannamo isagoo la dagaalay oo la fogeeyey, Eebana uma doorin gaalada Wiilal isna Malaa'igta Gabdho kama yeelan waa hadal gafa oo wayn oo gaaladu dhahaan, Quraankana Eebe wax badan buu ku caddeeyey kuna soo celceliyey xaqa in Dadku wacdoomo, Daalimiintase waxaan carar ahayn uma siyaadin, Eebana waa kali hadday Ilaahyo kale la jiraan siday gaaladu sheegi waxay isku dayi lahaayeen inay Awoodda Eebe oo kale yeeshaan, ama haddii kale Eebaha xaqa ah caabudaan iyana, Eebana waa ka nasahanyahay oo ka sarreeyaa waxay sheegi, waxaaba u tasbiixsada Toddobada Samo iyo Dhulka iyo waxa ku sugan, wax kastana wuxuu u tasbiixsadaa kuna mahdiyaa Eebe mase la kasayo tasbiixdooda,Eebana waa dulsame dambi dhaafa, la yaabna ma leh in wax walba Eebe weyneeyo xusana illeen isagaa Awood leh oo ahaysiiyey. sheegay in Rasuulku (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) u galay Dad Gaadiid saaran oo la taagan, kuna kor sheekaysan, markaasuu ku yidhi Rasuulku (Kora iyadoo Nabad qabta oo daaya iyadoo Nabad qabta, hana uga yeelanina sheekadiinna Waddooyinka iyo Suuqa kuraas (oo kale) maxay jirtaa mid la korsanyahay oo ka khayr roon kan korsan Eebana ka xusid badan. (Imaam Axmed) Eebaana Awood leh. Al-Israa' (39-44).**

---

وَإِذَا قَرَأْتَ ٱلْقُرْءَانَ جَعَلْنَا بَيْنَكَ وَبَيْنَ ٱلَّذِينَ
لَا يُؤْمِنُونَ بِٱلْءَاخِرَةِ حِجَابًا مَّسْتُورًا ﴿٤٥﴾

45. markaad Akhriyi Quraanka waxaan yeellaa dhexdaada iyo dhexda kuwaan rumeynin Aakhiro xijaab (dayr) asturan.

وَجَعَلْنَا عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَن يَفْقَهُوهُ وَفِىٓ ءَاذَانِهِمْ
وَقْرًا ۚ وَإِذَا ذَكَرْتَ رَبَّكَ فِى ٱلْقُرْءَانِ وَحْدَهُۥ وَلَّوْا۟
عَلَىٰٓ أَدْبَٰرِهِمْ نُفُورًا ﴿٤٦﴾

46. waxaana yeellay Quluubtooda dabool inay kasaan Quraanka, dhagohoodana culays, markaad ku xusto Eebahaana Quraanka kaligiis waxay u jeedsadaan Gadaal iyagoo carari.

نَّحْنُ أَعْلَمُ بِمَا يَسْتَمِعُونَ بِهِۦٓ إِذْ يَسْتَمِعُونَ إِلَيْكَ
وَإِذْ هُمْ نَجْوَىٰٓ إِذْ يَقُولُ ٱلظَّٰلِمُونَ إِن تَتَّبِعُونَ
إِلَّا رَجُلًا مَّسْحُورًا ﴿٤٧﴾

47. anagaa og waxay dhagaysan markay ku dhagaysan adiga iyagoo faqi markay dhihi Daalimiintu Waxaan Nin sixran ahayn ma Raacaysaan.

ٱنظُرْ كَيْفَ ضَرَبُوا۟ لَكَ ٱلْأَمْثَالَ فَضَلُّوا۟
فَلَا يَسْتَطِيعُونَ سَبِيلًا ﴿٤٨﴾

48. Day siday kuugu yeelaan tusaalayaal oy U dhumeen oyna u karin jidka Hanuunka.

وَقَالُوٓا۟ أَءِذَا كُنَّا عِظَٰمًا وَرُفَٰتًا أَءِنَّا لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا
جَدِيدًا ﴿٤٩﴾

49. Waxay dhaheen (gaaladii) ma markaan Noqonno lafo iyo burbur yaa nalagu soo celin Abuur cusub.

۞ قُلْ كُونُوا۟ حِجَارَةً أَوْ حَدِيدًا ﴿٥٠﴾

50. waxaad dhahdaa noqda dhagax ama bir.

51. ama khalqi (Abuur) ku wayn laabtiinna, waxayna dhihi yaa na soo celin ku dheh Eebihiin idin abuuray markii hore, waxayna kuu gilgili madaxooda iyagoo leh waa goorma isagu, waxaad dhahdaa waxaa suurowda inay dhawdahay.

أَوْ خَلْقًا مِّمَّا يَكْبُرُ فِي صُدُورِكُمْ ۚ فَسَيَقُولُونَ
مَن يُعِيدُنَا ۖ قُلِ ٱلَّذِى فَطَرَكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ ۚ
فَسَيُنْغِضُونَ إِلَيْكَ رُءُوسَهُمْ وَيَقُولُونَ
مَتَىٰ هُوَ ۖ قُلْ عَسَىٰٓ أَن يَكُونَ قَرِيبًا ﴿٥١﴾

52. waana maalintuu idiin yeedhi Eebe ood maqlaysaan isagoo mudan Mahad una malaynaysaan inaydaan nagaanin wax yar mooyee.

يَوْمَ يَدْعُوكُمْ فَتَسْتَجِيبُونَ بِحَمْدِهِۦ
وَتَظُنُّونَ إِن لَّبِثْتُمْ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٥٢﴾

Gaaladu xaqa iyo Quraanka way ka madax adaygi oo xijaabaa ka xiga xaggiisa,Qulubtooduna way daboolantahay, mana fahminayso Quraanka,Eebe kaliya marka la sheegana way cararaan iyagoo dooni in waxyaalo kale lala sheego, Eebaa og waxay dhagaysan iyo markay faqi, sheegina Daalimiintu in Nabigu yahay Nin sixran waxyaalo tusaalooyin ahna way u yeeleen, waxayse ka dhumeen xaqii iyo Jidkii, mana karaan unoqosho xaq, waxayna diidaan in la soo bixin iyagoo lafo iyo burbur Noqday, waxay doonise ha noqdeen ama dhagax ama Bir ama sida Cirka iyo wixii la mida, waxaa uun idin soo celin Eebihii markii hore idin Abuuray, waxayna madaxa la ruxaan kibir iyo isla wayni iyagoo warsan goortuu dhici xaalku, waxaase suurowda inuu dhawyahay, maalintase Eebe ugu yeedhi kulanka Qiyaame way maqli iyagoo Amaani una malaayn inayna ku nagaanin Adduunkii wax yar mooyee, wana kaas Quraankii, Nabigii, siday Gaalo u diideen, siday u dhagreen, siday soo bixinta u diideen, Eebaase soo celin Qiyaamana wataas, madax ruxii, isla waynidii iyo xaq diidna waxaa ka dambayn khasaare iyo lugooyo. Akhri Qi'sada Abuu sufyan, Abuu jahal iyo Akhras iyo siday u dhagaysteen Quraanka iyagoo kala gaban iyo siday isu warsadeen iyo hadalkii xumaa ee Abuu Jahal, xaqiibaase hadhay xumaanna tagtay. Al-Israa' (45-52).

---

53. waxaad ku dhahdaa Addoomadayda ha dheheen sida u fiican, Shaydaanku wuu fasaadin dhexdiinnee, Shaydaanna Dadka col cadbuu u yahay.

وَقُل لِّعِبَادِى يَقُولُوا۟ ٱلَّتِى هِىَ أَحْسَنُ ۚ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ
يَنزَغُ بَيْنَهُمْ ۚ إِنَّ ٱلشَّيْطَٰنَ كَانَ لِلْإِنسَٰنِ
عَدُوًّا مُّبِينًا ﴿٥٣﴾

54. Eebihiinaa idin og (waxaad tihiin) hadduu doono wuu idiin Naxariisan, hadduu doonana wuu idin Cadaabi, kuugumana aanaan dirin inaad wakiil (Ilaaliye u Noqoto).

رَّبُّكُمْ أَعْلَمُ بِكُمْ ۖ إِن يَشَأْ يَرْحَمْكُمْ أَوْ إِن يَشَأْ
يُعَذِّبْكُمْ ۚ وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ عَلَيْهِمْ وَكِيلًا ﴿٥٤﴾

55. Eebahaana waa ogyahay waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka, dhab ahaan baana ugu fadilnay Nabiyada Qaarkood qaarka (kale) waxaana Siinay Nabi Daawuud Zabuur.

وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِمَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ وَلَقَدْ فَضَّلْنَا
بَعْضَ ٱلنَّبِيِّـۧنَ عَلَىٰ بَعْضٍ ۖ وَءَاتَيْنَا دَاوُۥدَ زَبُورًا ﴿٥٥﴾

56. waxaad dhahdaa u yeedha kuwaad sheeegateen oo Eebe ka soo hadhay ma hantaan inay idinka faydaan dhib ama idinka wareejiyaan.

قُلِ ٱدْعُوا۟ ٱلَّذِينَ زَعَمْتُم مِّن دُونِهِۦ فَلَا يَمْلِكُونَ
كَشْفَ ٱلضُّرِّ عَنكُمْ وَلَا تَحْوِيلًا ﴿٥٦﴾

أُولَٰٓئِكَ ٱلَّذِينَ يَدۡعُونَ يَبۡتَغُونَ إِلَىٰ رَبِّهِمُ ٱلۡوَسِيلَةَ أَيُّهُمۡ أَقۡرَبُ وَيَرۡجُونَ رَحۡمَتَهُۥ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُۥٓۚ إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ كَانَ مَحۡذُورٗا ﴿٥٧﴾

57. kuwaas ay caabudina iyagaaba ka dooni xagga Eebe u dhawaansho iyo kusii dhawaansho waxayna Rajayn Naxariistiisa, wayna ka cabsan cadaabkiisa, cadaabka Eebana waa wax laga digtoonaado.

Eebana wuxuu faray Addoomadiisa inay wanaag ku hadlaan, illeen Shaydaanku Dadka dhexdiisu fasaadiyaaye, waana Colka Dadkee, Eebana waa ogyahay xaalka Dadka, Naxariis iyo Ciqaabba isagaa hanta, Nabigana waxaa loo diray gaadhsiinta xaqa, ee looma soo dirin inuu wakiil ka noqdo Dadka, Eebana wuu ogyahay waxa ku sugan Cirka iyo Dhulka, wuxuuna kala fadilay Nabiyada, Nabi Daawuud-na wuxuu siiyey Kitaabkii Zabuur ahaa, wax Eebe ka soo hadhay oo dhib faydi kara ama wareejn karana ma jiro, kuwa ay wax ka dayi ee ay baryi Naftoodaa Eebe u dhawaansho dooni oo Masaakii-na'Naxariistiisana rajayn kana cabsan cadaabkiisa, illeen cadaabka eebe waa laga digay waana wax laga digtoonaado, taasina waxay Muujin inay waajib tahay in hadal fiican lagu hadlo, in Shaydaan laga digtoonaado, in Naxariista Eebe lagu dadaalo heliddeeda iyo in laga digtoonaado cadaabkiisa (Eebaa laga magan galaaye). Al-Israa' (53-57).

---

وَإِن مِّن قَرۡيَةٍ إِلَّا نَحۡنُ مُهۡلِكُوهَا قَبۡلَ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ أَوۡ مُعَذِّبُوهَا عَذَابٗا شَدِيدٗاۚ كَانَ ذَٰلِكَ فِي ٱلۡكِتَٰبِ مَسۡطُورٗا ﴿٥٨﴾

58. Qaryo (Magaalo) Aanaan halaagayn ma jirto ka hor Qiyaamada ama aan la cadaabayn (Ciqaabayn) cadaab daran waana arrin ku qoran Kitaabka (Looxul Maxfuudka).

وَمَا مَنَعَنَآ أَن نُّرۡسِلَ بِٱلۡأٓيَٰتِ إِلَّآ أَن كَذَّبَ بِهَا ٱلۡأَوَّلُونَۚ وَءَاتَيۡنَا ثَمُودَ ٱلنَّاقَةَ مُبۡصِرَةٗ فَظَلَمُواْ بِهَاۚ وَمَا نُرۡسِلُ بِٱلۡأٓيَٰتِ إِلَّا تَخۡوِيفٗا ﴿٥٩﴾

59. Umana aanaan daynin soo diridda Aayado (Mucjiso) inay beeniyeen kuwii hore mooyee, waxaana siinnay Thamuud Hashii oo wax tusisa wayna ku dulmi faleen (ka gaaloobeen) Aayadaha waxaan Cabsi galin ahayn uma soo dirro (Dejinno).

وَإِذۡ قُلۡنَا لَكَ إِنَّ رَبَّكَ أَحَاطَ بِٱلنَّاسِۚ وَمَا جَعَلۡنَا ٱلرُّءۡيَا ٱلَّتِيٓ أَرَيۡنَٰكَ إِلَّا فِتۡنَةٗ لِّلنَّاسِ وَٱلشَّجَرَةَ ٱلۡمَلۡعُونَةَ فِي ٱلۡقُرۡءَانِۚ وَنُخَوِّفُهُمۡ فَمَا يَزِيدُهُمۡ إِلَّا طُغۡيَٰنٗا كَبِيرٗا ﴿٦٠﴾

60. (Xusuuso) markaan kugu nidhi Eebahaa wuxuu koobaa Dadka, kamana aanaan yeelin Riyadaan ku tusinay fidmada Dadka mooyee (Imtixaan) iyo Geedka lagu lacnaday Quraanka, waanu ku cabsiin umana siyaadiyo waxaan xadgudub wayn ahayn.

وَإِذۡ قُلۡنَا لِلۡمَلَٰٓئِكَةِ ٱسۡجُدُواْ لِأٓدَمَ فَسَجَدُوٓاْ إِلَّآ إِبۡلِيسَ قَالَ ءَأَسۡجُدُ لِمَنۡ خَلَقۡتَ طِينٗا ﴿٦١﴾

61. (Xusuuso) markaan ku nidhi Malaa'igta u Sujuuda Aadan oy Sujuudeen Ibliis moyee, oo yidhi ma waxaan u sujuudi waxaad Abuurtay isagoo dhooba ah,

قَالَ أَرَءَيۡتَكَ هَٰذَا ٱلَّذِي كَرَّمۡتَ عَلَيَّ لَئِنۡ أَخَّرۡتَنِ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِ لَأَحۡتَنِكَنَّ

62. wuxuuna yidhi ka warran kan aad iga sharriftay, haddaad dib ii dhigto tan iyo Qiyaamada waxaan ka adkaan

(Dhumin) Faraciisa wax yar mooyee.

ذُرِّيَّتَهُۥٓ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٦٢﴾

Magaalo kasta waaxaa u dambeeya halaag Qiyaamada ka hor ama ciqaab daran, waana xaal ku qoran Luuxul Maxfuudka, Eebana wuxuu u daayey soo Dejinta Mucjisadaha waxaa Beeniyey kuwii hore, waxaana kamid ahaa Hashii Reer Thamuud loo soo bixiyey ee ku tusinaysay Awoodda Eebe, wayna ka Gaaloobeen. waxayna Gaaladii Makaad warsadeen Nabiga waxyaalo ay ku dhibayeen sida in buuraha Dahab looga dhigo, iyo Togog loo jeexo iyo waxyaalo kale, Mucjisadana Eebe wuxuu u soo dejiyaa Cabsiin.
Riyaduu Nabigu arkay iyo Geedka lagu Lacnaday Quraankana waa Imtixaan, Eebana wuu koobay Dadka, wuuna cabsiin badankoodse way xadgudbaan oo fasaadka badiyaan. Qisada Sujuudda Malaa'igta iyo diidada Ibliisna waxaa lagu sheegay Toddobo Suuradood, waxaase loo baahan yahay in lagu waano qaato, Ibliisna laga digtoonaado, xaqana lagu tooso. Al-Israa' (58-62).

---

63. Eebe wuxuu ku yidhi: Tag ciddii ku raacda oo ka midana Jahannamaa Jasihiisu yahay abaal marin dhamaystiran.

قَالَ ٱذْهَبْ فَمَن تَبِعَكَ مِنْهُمْ فَإِنَّ جَهَنَّمَ
جَزَآؤُكُمْ جَزَآءً مَّوْفُورًا ﴿٦٣﴾

64. ku duufso ciddaad karto oo ka mida codkaaga kuna soo Jiido fardahaaga iyo lugtaada lana wadaag xoolaha iyo Carruurta una yabooh, mana yabooho shaydaan waxaan dhagar ahayn (iyo Baadi).

وَٱسْتَفْزِزْ مَنِ ٱسْتَطَعْتَ مِنْهُم بِصَوْتِكَ وَأَجْلِبْ
عَلَيْهِم بِخَيْلِكَ وَرَجِلِكَ وَشَارِكْهُمْ فِى ٱلْأَمْوَٰلِ
وَٱلْأَوْلَٰدِ وَعِدْهُمْ ۚ وَمَا يَعِدُهُمُ ٱلشَّيْطَٰنُ
إِلَّا غُرُورًا ﴿٦٤﴾

65. Addoomadayda kuma lihid xujo, Eebahooda waa ku filan yahay wakiil (Ilaaliye).

إِنَّ عِبَادِى لَيْسَ لَكَ عَلَيْهِمْ سُلْطَٰنٌ ۚ وَكَفَىٰ
بِرَبِّكَ وَكِيلًا ﴿٦٥﴾

66. Eebihiin waa kan idinku wada doonta (Markabka) Badda dhexdeeda inaad doonataan Fadligiisa (Risqi) Eebana waa idiin Naxariiste.

رَّبُّكُمُ ٱلَّذِى يُزْجِى لَكُمُ ٱلْفُلْكَ فِى ٱلْبَحْرِ
لِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦٓ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا ﴿٦٦﴾

67. markuu idinku taabto badda dhibna wuu dhumaa waxaad baryeyseen Eebe mooyee, markuu idiin soo koriyo Barrigana waad jeedsatan Dadkuna waa Gaalnimo badane.

وَإِذَا مَسَّكُمُ ٱلضُّرُّ فِى ٱلْبَحْرِ ضَلَّ مَن تَدْعُونَ إِلَّآ إِيَّاهُ ۖ
فَلَمَّا نَجَّىٰكُمْ إِلَى ٱلْبَرِّ أَعْرَضْتُمْ ۚ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ كَفُورًا ﴿٦٧﴾

Eebe wuxuu ugu Jawaabay tag adiga iyo inta ku raacda naarta Jahannamaa abaal loo dhameeyey looga dhigiye, kuna duufso ciddaad karto codkaaga oo Hees, Durbaan iyo Cid kastoo xumaan u yeedhi, kuna kaxayso fardahaaga iyo Lugtaada lana wadaag xoolaha iyo Carruurta, wuxuu yidhi Ibnu Cabbaas: xoolo la wadaagiddu waa xumaanta ay ku bixiyaan, Xasan Basrina wuxuu yidhi: Waa kasabkeeda xaaraan iyo ku bixin dambi, la wadaagidda Carruurtana waa Dayiciddooda iyo xumayn akhalaaqdooda siduu yidhi Xasan Basri, waa gaalaynta aiyo Islaamka ka bixinta, yabooha shaydaanna waa lugooyo, addoomada Eebe ee fiicanse xujo kuma leh, Eebaana Wakiil ku filan, Nicmooyinkiisa waxaa ka mida inuu Badda u sahlay dadka kuna maraan Markab iyagoo fadliga iyo Risqiga Eebe raadsan.waana u Naxariistaa Ummaddiisa, markuu dhib ku taabto baddana waxay halmaamaan wax kastooy Baryayeen oo Eebe ka soo hadhay, markay Barriga tagaanna way jeedsadaan,Dadkuna waa Gaalimo badan yahay.saas Darteed waa in laga digtoonaado Shaydaan iyo Jidkiisa, waa in xoolaha iyo carruurta xumaan laga dhawraa, Nicmooyinka Eebana lagu Mahdiyaa. Al-Israa' (63-67).

68. Miyaad ka Aamin Noqoteen in Eebe idinla Gooyo dhinac Dhulka ka mida, ama idinku soo diro Dabayl daran markaas aydaan helin Wakiil.

أَفَأَمِنتُمْ أَن يَخْسِفَ بِكُمْ جَانِبَ ٱلْبَرِّ أَوْ يُرْسِلَ
عَلَيْكُمْ حَاصِبًا ثُمَّ لَا تَجِدُوا۟ لَكُمْ وَكِيلًا ﴿٦٨﴾

69. Miyaadse ka Aamin Noqoteen inuu idinku celiyo (Badda) mar kale oos idinku diro Dabayl (wax jajabisa) oos idin Maansheeyo gaalnimadiinna darteed, markaas aydaan u helin wax noo raacda.

أَمْ أَمِنتُمْ أَن يُعِيدَكُمْ فِيهِ تَارَةً أُخْرَىٰ فَيُرْسِلَ
عَلَيْكُمْ قَاصِفًا مِّنَ ٱلرِّيحِ فَيُغْرِقَكُم بِمَا كَفَرْتُمْ
ثُمَّ لَا تَجِدُوا۟ لَكُمْ عَلَيْنَا بِهِۦ تَبِيعًا ﴿٦٩﴾

70. dhabbaanu u sharrifnay Binii Aadamka waxaana ku xambaarray Barriga iyo Baddaba waxaana ku arsaaqnay wanaag,waxaana ka fadilnay wax badan oo ka mida waxaan Abuurray fadilaad.

۞ وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِىٓ ءَادَمَ وَحَمَلْنَٰهُمْ فِى ٱلْبَرِّ وَٱلْبَحْرِ
وَرَزَقْنَٰهُم مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ وَفَضَّلْنَٰهُمْ
عَلَىٰ كَثِيرٍ مِّمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلًا ﴿٧٠﴾

71. (xusuuso) Maalintaan cid walba ugu yeedhayno Imaamkeeda «Quraanka ama Nabiga», ciddiise laga siiyo Kitaabkiisa Midigta kuwaasi way akhrin Kitaabkooda lagamana dulmiyo xuub laf timireed.

يَوْمَ نَدْعُوا۟ كُلَّ أُنَاسٍۭ بِإِمَٰمِهِمْ ۖ فَمَنْ أُوتِىَ
كِتَٰبَهُۥ بِيَمِينِهِۦ فَأُو۟لَٰٓئِكَ يَقْرَءُونَ
كِتَٰبَهُمْ وَلَا يُظْلَمُونَ فَتِيلًا ﴿٧١﴾

72. cidiise Adduunka ku indho la' (xaqa diida) aakharana wuu indho la'aan oo ka dhumi Jidka.

وَمَن كَانَ فِى هَٰذِهِۦٓ أَعْمَىٰ فَهُوَ فِى ٱلْءَاخِرَةِ أَعْمَىٰ
وَأَضَلُّ سَبِيلًا ﴿٧٢﴾

Cidna kama aamin aha Ciqaabta Eebe ama dhulka ha la Gooyo ama Badda ha ku Maansheeyo iyo sidii kasta oo uu doono,wax ka daba kicina ma jiro,Eebana wuu sharrifay Banii Aadamka, Caqliga, Abuurka, Maqalka, Aragga, iyo wax yaale kale, wuxuuna u fududeeyey ku safarka iyo ku socodka Barriga iyo Badda, kuna Arsaaqay wanaag, kana fadilay wax badan oo khalqigiisa ah, cid walbana wuxuu Eebe ugu yeedhi Qiyaamada ama Nabigeedii ha Noqdo ama Kitaabkii loo soo Dejiyey iyo camalkiisii, ciddase Liibaani waa midda Kitaabkeeda Midigta laga siin oo akhrin iyagoo ku faraxsan oon la dhibaataynm, ciddiise xaqa ka indho la'ayd Adduunka oo ka leexatay Nuurka Eebe Aakharana way sii indho Beeli oo khasaari, illeen horay bay xaqa uga soo indho beeshaye. Taasina waxay adkayn in Eebe laga digtoonaado, in Quraanka iyo Nabiga Imaama laga yeesho, in xaqa lagu dadaalo si aan loo Dhumin loogana indho beelin Adduun iyo Aakhiraba, Eebana Hanuun la warsado. Al-Israa' (68-72).

---

73. Waxay u dhawaadeen Gaaladii inay kaa Fidmeeyaan waxaan kuu waxyoonay inaad Nagu been abuuratid wax kale, Markaas ay kaa Yeeshaan Saaxiib.

وَإِن كَادُوا۟ لَيَفْتِنُونَكَ عَنِ ٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ
إِلَيْكَ لِتَفْتَرِىَ عَلَيْنَا غَيْرَهُۥ ۖ
وَإِذًا لَّٱتَّخَذُوكَ خَلِيلًا ﴿٧٣﴾

74. Hadaanan ku sugin waxaad u dhawaan lahayd inaad u iilato xagooda wax yar.

وَلَوْلَآ أَن ثَبَّتْنَٰكَ لَقَدْ كِدتَّ
تَرْكَنُ إِلَيْهِمْ شَيْـًٔا قَلِيلًا ﴿٧٤﴾

75. Markaasaan ku dhadhansiin lahayn (Cadaab) Labanlaaban nolosha Adduun iyo Mid labanlaaban Geerida Manahesheen gargaare.

إِذًا لَّأَذَقْنَاكَ ضِعْفَ الْحَيَاةِ وَضِعْفَ الْمَمَاتِ
ثُمَّ لَا تَجِدُ لَكَ عَلَيْنَا نَصِيرًا ﴿٧٥﴾

76. Waxayna u dhawaadeen inay kaa argagixiyaan Dhulka inay kaa bixiyaan Markaas oyna nagaadeen Gadaashaada wax yar Mooyee.

وَإِن كَادُوا لَيَسْتَفِزُّونَكَ مِنَ الْأَرْضِ
لِيُخْرِجُوكَ مِنْهَا ۖ وَإِذًا لَّا يَلْبَثُونَ خِلَافَكَ
إِلَّا قَلِيلًا ﴿٧٦﴾

77. Waana sunnada Rasuuladaan dirray Hortaa, una heli maysid Sunnadannada Wax dooriya (Leexin).

سُنَّةَ مَن قَدْ أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ مِن رُّسُلِنَا ۖ
وَلَا تَجِدُ لِسُنَّتِنَا تَحْوِيلًا ﴿٧٧﴾

Eebe wuxuu ka warramay siduu ugu Gargaaray Nabigiisa, una Sugayay Inkastoy Gaaladii isku dayeen inay Xaqa ka leexiyaan waxay Rabaanna uu yeelo, Ciddii Muslin ah ee xaqa uga leexata Gaalada darteedna si Ay Saaxiib ula noqdaan waa mid Halaag iyo Khasaare ku danbayn iyo Ciqaab adduun iyo mid Aakhiroba, Waxayna Gaaladu had iyo Jeer isku Dayi in Muslimiintu u soo dhawaadaan, Waase dulli Adduun iyo mid Aakhiro iyo Gargaarid la'aan, Gaaladiina waxay isku dayeen inay Nabiga (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka saaraan Dhulka miyayse kaga danbayn wax yar mooyee, Saasayna u dhacday arrintii, Waana sunnada Eebe ee uu ku falay kuwuu horay u diray, Wax baddali karana ma jiro, Dadka wanaagsan la noolidooda waa tan fiican, Markase Dhulka ka madho wanaag iyo dadkiis waa uun halaag, Ciqaab iyo Khasare sida dhacda.
Aayaduhuna waxay adkayn: Ku sugnaan xaqa, Ka digtoonida u dhawaansho iyo la saaxiibidda gaalada, Ka digtoonida in dadka fiican Dhulka laga Eryo (ama ha ku soo degto reer makaad ama Yuhuud waa Arrin guud oo caama). Al-Israa' (73-77).

---

78. Oog salaadda markay Qorraxdu suusho Ilaa madawga Habeenka iyo Quraanka (Salaada) waabariga (subaxa) Quraanka waabariguna waa mid la Joogee (Malaa'igta).

أَقِمِ الصَّلَاةَ لِدُلُوكِ الشَّمْسِ إِلَىٰ غَسَقِ اللَّيْلِ
وَقُرْآنَ الْفَجْرِ ۖ إِنَّ قُرْآنَ الْفَجْرِ كَانَ
مَشْهُودًا ﴿٧٨﴾

79. Habeenkana Tahajud (Qaar tuka) isagoo Dheeraad kuu ah, Waxay u dhawdahay In Eebahaa kuu soo bixiyo maqaam la Mahadiyo (Shafeecada).

وَمِنَ اللَّيْلِ فَتَهَجَّدْ بِهِ نَافِلَةً لَّكَ عَسَىٰ
أَن يَبْعَثَكَ رَبُّكَ مَقَامًا مَّحْمُودًا ﴿٧٩﴾

80. Waxaad dhahdaa Eebow i gali Meel galid run ah, ina bixi bixin runa, iigana Yeel agtaada Xujo gargaara.

وَقُل رَّبِّ أَدْخِلْنِي مُدْخَلَ صِدْقٍ وَأَخْرِجْنِي مُخْرَجَ
صِدْقٍ وَاجْعَل لِّي مِن لَّدُنكَ سُلْطَانًا نَّصِيرًا ﴿٨٠﴾

81. Waxaad dhahdaa waxaa yimid Xaqii Waxaana tirtirmay Baadhilkii, Baadhilkiina Wuxuu noqday mid la tirtiro.

وَقُلْ جَاءَ الْحَقُّ وَزَهَقَ الْبَاطِلُ ۚ
إِنَّ الْبَاطِلَ كَانَ زَهُوقًا ﴿٨١﴾

82. Waxaana soo dajinaynaa Quraanka Isagoo caafimaad iyo Naxariis

وَنُنَزِّلُ مِنَ الْقُرْآنِ مَا هُوَ شِفَاءٌ وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ

u ah Mu'miniinta, Daalimiintana uma siyaadiyo Waxaan Khasare ahayn.

وَلَا يَزِيدُ ٱلظَّٰلِمِينَ إِلَّا خَسَارًا ﴿٨٢﴾

Aayaddu waxay sheegtay waqtiyada salaadda laga Billaabo Duhurkii ilaa Subaxa, Inkastoo Xadiithyo badan cadeeyeen waqtiyadaas. abuu hurayrana Wuxuu nabiga ka wariyay (Naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) In salaadda subax Malaa'igtii habeenka iyo tii Maalintii Xaadiri (oo joogi) (Imaam axmed iyo kuwo kale yaa wariyay). Wuxuuna Eebe faray Nabiga Inuu si Dheeraada u tukado Habeenkii, inkastooy Cid walba Sunno u tahay Inuu tukado habeenkii, Hadana waxaa la sheegay inay nabiga Faral ku Ahayd Salaad u kicidda Habeenkii, Wuxuuna Eebe ugu bishaareeyay Nabiga Maqaam la mahadiyo , oo ah Shafeecada Qiyaamada marka Nabiyada la soo maro Dhibaataduna darraato, Waryaa shafeecana la is warsado sida xadiithyo badan ku sugnaatay, waxaana ka mida: waa lay idmi markaasaan dhihi wuxuu Eebe doono inaan dhaho, Waana Maqaamka la mahadiyay, (imaamu axmed), Wuxuuna Eebe Nabiga faray inuu warsado inuu meel fiicanna galiyo bixin Fiicanna bixiyo gargaarra siiyo, illeen xaqiibaa yimide, Baadhilna wuu tirtirmaye, Quraankuna waa daawada iyo Naxariista Mu'miniinta iyo Khasaaraha Daalimiinta iyo gaalada, Ciddii raacdana waa u khayr tii ka leexatana waa u khasaare. Al-Israa' (78-82).

83. Markaan u nicmaynno dadka wuu Jeedsadaa (xaqa ka fogaadaa) Haduu taabto dhibna wuu quustaa.

وَإِذَآ أَنْعَمْنَا عَلَى ٱلْإِنسَٰنِ أَعْرَضَ وَنَـَٔا بِجَانِبِهِۦ ۖ وَإِذَا مَسَّهُ
ٱلشَّرُّ كَانَ يَـُٔوسًا ﴿٨٣﴾

84. Waxaad dhahdaa cid kasta ha ku camal fasho jidkeeda (Diinteeda) Eebihiinbaa og Cidda jidkeedu hanuun badan yahaye.

قُلْ كُلٌّ يَعْمَلُ عَلَىٰ شَاكِلَتِهِۦ فَرَبُّكُمْ أَعْلَمُ
بِمَنْ هُوَ أَهْدَىٰ سَبِيلًا ﴿٨٤﴾

85. Waxay ku warsan Ruuxda, dheh ruuxdu waa Amarka Eebahay Cilmina wax yarbaa la idin siiyay.

وَيَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلرُّوحِ ۖ قُلِ ٱلرُّوحُ مِنْ أَمْرِ رَبِّى
وَمَآ أُوتِيتُم مِّنَ ٱلْعِلْمِ إِلَّا قَلِيلًا ﴿٨٥﴾

86. Haddaan doonno waanu la tagi kaan kuu Waxyoonay (Quraanka) Markaasna uma helaysid Korkannaga wakiil (gargaare).

وَلَئِن شِئْنَا لَنَذْهَبَنَّ بِٱلَّذِىٓ أَوْحَيْنَآ إِلَيْكَ
ثُمَّ لَا تَجِدُ لَكَ بِهِۦ عَلَيْنَا وَكِيلًا ﴿٨٦﴾

87. Naxariista Eebahaa Mooyee illeen fadligiisu Korkaaga waa ku wayn yahaye.

إِلَّا رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ ۚ إِنَّ فَضْلَهُۥ كَانَ عَلَيْكَ
كَبِيرًا ﴿٨٧﴾

88. Waxaad dhahdaa hadday u kulmaan Insi iyo Jinni inay la yimaadaan Quraankan oo Kale lama imaan karaan wax lamida Qaarkood qaar haba caawiyee.

قُل لَّئِنِ ٱجْتَمَعَتِ ٱلْإِنسُ وَٱلْجِنُّ عَلَىٰٓ أَن يَأْتُوا۟
بِمِثْلِ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانِ لَا يَأْتُونَ بِمِثْلِهِۦ وَلَوْ كَانَ
بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ ظَهِيرًا ﴿٨٨﴾

89. Dhabaan ugu Cadaynay dadka Quraanka Tusaale kasta dadka badankiise wuu diiday Gaalnimo mooyee.

ولقد صرفنا للناس في هذا القرءان من كل مثل
فأبى أكثر الناس إلا كفورا ﴿٨٩﴾

Dabeecada dadka Badankiis waxaa ka mida inuu kibro oo xaqa ka jeedsado Markuu ladan yahay, markuu dhibtaabtana quustaa oon rajayn inuu khayr heli, cid walbase ha ku socoto Waddadeeda illeen Eebe wuu ogyahay cidda hanuunsan iyo tan kale wuuna abaal marine, Ruuxduna waa arrin amarka Eebe ah oosan cidna barin, ciddii warsatayna saasaa loogu jawaabay ama ree Makaad ha noqdeen ama Yuhuudu ha ku kaalmayse, Dadkana cilmigoodu waa yar yahay inkastooy qaar ismoodaan inay cilmi badan yihiin, Eebaa laga magan galay ee wuxuu caddeeyey in hadduu doono uu la tagi Quraanka cid u raacanna ayan jirin, Eebe Naxariistiisa mooyee oo fadliga Eebe Rasuulka siiyey waa wayn yahay, hadday Insi iyo Jinniba kulmaan inay Quraankoo kale keenaana ma keeni karaan haba isugu kaalmeeyaane, Quraankana Eebe wax badan yuu ku caddeeyey tusaale Dadka badankiise Diid waxaan gaalimo ahayn, Ceebayna ku tahay Dadka inay markay ladanyihiin xaqa ka jeedsadaan, dhibkana Quustaan, waxaan anfacayna warsadaan, illeen Eebaa Awood leh oo Quraanka soo Dejiyey, wax keeni wax ku soo dhawna ma jiro Insi iyo Jinni. Al-Israa' (83-89).

---

90. waxay dheheen Gaaladii (Makaad) ku rumayn mayno intaad nooga jeexdo Dhulka Ilo (Burqan).

وقالوا لن نؤمن لك حتى تفجر لنا من الأرض
ينبوعا ﴿٩٠﴾

91. ama kuu ahaan Beer Timir iyo Cinaba ood ku sii dayso dhexdeeda Wabiyo socda.

أو تكون لك جنة من نخيل وعنب
فتفجر الأنهر خللها تفجيرا ﴿٩١﴾

92. ama nagaga soo riddid Samada saad sheegatay, Goosimo iyadoo ah, ama u keentid Eebe iyo Malaa'igta si caddaana.

أو تسقط السماء كما زعمت علينا كسفا
أو تأتي بالله والملئكة قبيلا ﴿٩٢﴾

93. ama kuu ahaado Guri dahaba ama ka kortid samada, kuna rumayn mayno koriddaada intaad noogaga soo dejisid kitaab aan Akhrino, waxaad dhahdaa Eebahaybaa Nasahane ma waxaan bashar (Dad) Rasuula ahayn baan ahay.

أو يكون لك بيت من زخرف أو ترقى في السماء
ولن نؤمن لرقيك حتى تنزل علينا كتبا نقرؤه
قل سبحان ربي هل كنت إلا بشرا رسولا ﴿٩٣﴾

94. Dadka uma diidin inay Rumeeyaan markuu xaqu u yimid oon ahayn inay dhahaan ma wuxuu soo bixiyaa Eebe Bashar (Dad) ah Rasuullo.

وما منع الناس أن يؤمنوا إذ جاءهم الهدى
إلا أن قالوا أبعث الله بشرا رسولا ﴿٩٤﴾

95. waxaad dhahdaa hadday Dhulka yihiin Malaa'ig ku xasilloon (Degan)

قل لو كان في الأرض ملئكة يمشون

waxaan uga soo Dejin lahayn Samada Malag Rasuula.

مُطْمَئِنِّينَ لَنَزَّلْنَا عَلَيْهِم مِّنَ السَّمَاءِ
مَلَكًا رَّسُولًا ﴿٩٥﴾

Gaalada iyo Caqliga yar waxay had iyo jeer Dadka ku Qiimeeyaan Xoolaha iyo wixii soo raaca, saas darteed waxay u soo Jeediyeen Gaaladii Makaad Nabiga inuu Ilo Biyo ah u Jeexo, ama Beer Barwaaqo ah u ahaato, ama Cirka ku soodumiyo iyagoo sheegi in Nabigu saas ku yidhi, ama Guri Dahab ah u sugnaado, ama Cirka ka koro, ayan rumayneyn koriddiisa intuu waraaqo ay Akhristaan uga keeno, Eebaa Nasahan oo wayn, Nabigu ma waxaan Dad Eebe u waxyooday ahaynbaa. aadbay isula waynyihiin una Madax adkaayeen, Sharaftana xoolo, guryo, Beero iyo Biyo socda u moodeen, waxaase ka sarreeysa Nabinimo, Quraan, Akhlaaq, Caddaalad, Eebe Aqoonsi iyo Liibaan Aakhiro, hadday Malaa'igi deganta-hay Dhulka Eebe wuxuu usoo diri lahaa Malag Rasuula, Dadbaase degan marka waa in Dad la mida loo soo diro warka kalana layska dhaafo. Al-Israa' (90-95).

---

96. waxaad dhahdaa Eebaa ugu filan Marag dhexdeenna, isaguna waa ogaha arka Addoomadiisa.

قُلْ كَفَىٰ بِاللَّهِ شَهِيدًا بَيْنِي وَبَيْنَكُمْ
إِنَّهُ كَانَ بِعِبَادِهِ خَبِيرًا بَصِيرًا ﴿٩٦﴾

97. Cidduu Eebe Hanuuniyo umbaa hanuunsan, cidduu Dhumiyana uma helaysid ugargaare Eebe ka soo had-hay, waxaana ku soo kulminaynaa Qiyaamada Wajigooda iyagoo Indho la' oo hadal la'oo Dhaga la', Hooygoo-duna waa Jahannamo, markastooy Dantana waxaan u siyaadinaa Shidid (Hurin).

وَمَن يَهْدِ اللَّهُ فَهُوَ الْمُهْتَدِ وَمَن يُضْلِلْ فَلَن تَجِدَ
لَهُمْ أَوْلِيَاءَ مِن دُونِهِ وَنَحْشُرُهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ
عَلَىٰ وُجُوهِهِمْ عُمْيًا وَبُكْمًا وَصُمًّا مَّأْوَاهُمْ جَهَنَّمُ
كُلَّمَا خَبَتْ زِدْنَاهُمْ سَعِيرًا ﴿٩٧﴾

98. taasina waa Abaalkooda ah inay ka gaaloobeen Aayaadkanaga, oy dhe-heen markaan lafo noqonno iyo burbur miyaa nala soo bixin Abuur Cusub.

ذَٰلِكَ جَزَاؤُهُم بِأَنَّهُمْ كَفَرُوا بِآيَاتِنَا وَقَالُوا
أَإِذَا كُنَّا عِظَامًا وَرُفَاتًا أَإِنَّا لَمَبْعُوثُونَ خَلْقًا
جَدِيدًا ﴿٩٨﴾

99. miyeyna ogayn Eebaha Abuuray Samooyinka iyo Dhulka inuu karo inuu Abuuro wax la mida una yeelo muddo aan shaki lahayn, wayse diideen Daalimiintii Gaalimo mooyee (wax kale).

۞ أَوَلَمْ يَرَوْا أَنَّ اللَّهَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَاوَاتِ
وَالْأَرْضَ قَادِرٌ عَلَىٰ أَن يَخْلُقَ مِثْلَهُمْ وَجَعَلَ
لَهُمْ أَجَلًا لَّا رَيْبَ فِيهِ فَأَبَى الظَّالِمُونَ
إِلَّا كُفُورًا ﴿٩٩﴾

100. waxaad dhahdaa idinku haddaad hanataan khasnadaha Naxariista Eeba-

قُل لَّوْ أَنتُمْ تَمْلِكُونَ خَزَائِنَ رَحْمَةِ رَبِّي إِذًا

hay waad xajisan lahaydeen ka cabsi faqri, Dadku waa Bakhayl.

لَأَمْسَكْتُمْ خَشْيَةَ ٱلْإِنفَاقِ ۚ وَكَانَ ٱلْإِنسَٰنُ قَتُورًا ﴿١٠٠﴾

Eebaa marag ugu filan Runnimada Nabiga, wuxuuna ogyahay oo Arkaa Addoomadiisa, cidduu Hanuuniyo umbaa hanuunsan, tuu dhumiyana cid u gargaari ma jirto, waxaana loo soo kulmin kuwaas iyagoo Wajigooda ku socda illeen Eebaha Lugahooda ku waday wuu karaa inuu ku wado Wajigoodee, siduu Nabigu yidhi, waxayna imaan iyagoon wax arkayn, hadlayna, waxna maqlayn, kuna hoyan Jahannamo markay dantaba la sii hurin, waana Abaalkooda illeen Aayaadka Eebay ka Gaaloobeene, waxayna diideen in Eebe soo bixin intay lafo iyo Burbur Noqdeen waxayse illoobeen in Eebaha Abuuray Cirka iyo Dhulka uu karo iyagoo kale Qiyaamada, una yeelay muddo dhaba, Gaalo iyo daalimiinse waxaan xumaan ku madax taag ahayn waa diideen, Eebaana Hodana Dadkuse waa fuqaro hadday Khasnadaha Naxariista Eebe haystaanna way xajisan lahayeen iyagoo faqri ka yaabi illeen Dad waa Bakhayle. Al-Israa' (96-100).

101. waxaan dhab u siinay (Nabi) Muuse sagaal Aayadood (Mucjiso) oo cad cad ee warso Binii Israa'iil markuu u yimid oo ku yidhi Fircoon waxaan kuu malayn Muusow mid la sixray.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَىٰ تِسْعَ ءَايَٰتٍۭ بَيِّنَٰتٍ ۖ فَسْـَٔلْ
بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ إِذْ جَآءَهُمْ فَقَالَ لَهُۥ فِرْعَوْنُ
إِنِّى لَأَظُنُّكَ يَٰمُوسَىٰ مَسْحُورًا ﴿١٠١﴾

102. wuxuuna yidhi (Nabi Muuse) waad ogtahay inuusan soo dejinin kuwaan waxaan Eebaha Samooyinka iyo Dhulka ahayn iyagoo xujooyin ah, anna waxaan kuu malayn Fircoonow mid la halaagi.

قَالَ لَقَدْ عَلِمْتَ مَآ أَنزَلَ هَٰٓؤُلَآءِ إِلَّا رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ
وَٱلْأَرْضِ بَصَآئِرَ وَإِنِّى لَأَظُنُّكَ
يَٰفِرْعَوْنُ مَثْبُورًا ﴿١٠٢﴾

103. markaasuu doonay fircoon inuu ka kaxeeyo Dhulka markaasaan Maansheynay isagii iyo intii la jirtay dhammaan.

فَأَرَادَ أَن يَسْتَفِزَّهُم مِّنَ ٱلْأَرْضِ
فَأَغْرَقْنَٰهُ وَمَن مَّعَهُۥ جَمِيعًا ﴿١٠٣﴾

104. waxaana ku nidhi gadaashiis BaniiIsraa'iil dambane waanu idin keeni dhamaan.

وَقُلْنَا مِنۢ بَعْدِهِۦ لِبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱسْكُنُوا۟ ٱلْأَرْضَ
فَإِذَا جَآءَ وَعْدُ ٱلْءَاخِرَةِ جِئْنَا بِكُمْ لَفِيفًا ﴿١٠٤﴾

105. xaqbaana ku soo dejinay Quraanka xaqbuuna ku soo degay, waxaana ku dirray adoo Bishaareeye u diga ah,.

وَبِٱلْحَقِّ أَنزَلْنَٰهُ وَبِٱلْحَقِّ نَزَلَ ۗ وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ
إِلَّا مُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿١٠٥﴾

106. waana Quraan oon u kala bixinnay (soo dejintiisa) inaad ku akhrido

وَقُرْءَانًا فَرَقْنَٰهُ لِتَقْرَأَهُۥ عَلَى ٱلنَّاسِ عَلَىٰ مُكْثٍ

وَنَزَّلْنَٰهُ تَنزِيلًا ﴿١٠٦﴾

dadka kaadsiinyo, waana soo dejinay soo dejin Qaar Qaar ah.

Eebe wuxuu siiyey lana soo bixiyey Nabi Muuse Sagaal Mucjiso, oo kala ah sida Aayaddu sheegtay: Ushii, Gacantii, Abaartii, Baddii, Maanshayntii, Ayixii, Injirtii, Rihii iyo Dhiigii ama Nusqaantii midhaha, Banii Israa'iilla waa ogyihiin, Fircoonse wuxuu ugu Jawaabay inuu dhaho Muusow waxaan kuu malayn in lagu sixray, wayna is maleeyeen Fircoon iyo Nabi Muuse, waxaase rumoobay malihii Nabi Muuse oo yidhi waad ogtahay inuu Aayadahan soo Dejiyey Eebaha Cirka iyo dhulka isagoo xujooyin waano ah waxaana kuu malayn Fircoonow mid la halaagi, waana la halaagay markuu isku deyey inuu dhulka ka bixiyo oo la maansheeyey isagii iyo intii la jirtay, dhulkiina u hadheen oo dageen Banii Israa'iil inta yaboohii Eebe ee soo uruurintooda laga gaadhi, Quraanka Eebaa xaq ku soo Dejiyey, Xaqbuuna ku soo degay Nabiguna wa Bishaareeye Diga, soo dejinta Quraankuna hal mar ma ahayn ee wuxuu soo degayey Saddex iyo Lebaatan sano; Saddex iyo Toban sano Maka ah iyo toban sanoo Madiina ah, si Dadka loogu akhriyo kaadsiinyo iyo inyar inyar, waana xigmadda iyo Naxariista Eebe illeen hadduu hal mar soo dego siday gaaladu codsadeen waa lagu dhibboon lahaa. waxaase loo baahanyahay Raacidda Quraanka, ku dhaqankiisa, Barashadiisa, ugu yeedhidiisa, si loo Liibaano, illeen waa xaqii Eebaheenna wayn soo dejiyaye. Al-Israa' (101-106).

قُلْ ءَامِنُوا۟ بِهِۦٓ أَوْ لَا تُؤْمِنُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ مِن قَبْلِهِۦٓ
إِذَا يُتْلَىٰ عَلَيْهِمْ يَخِرُّونَ لِلْأَذْقَانِ سُجَّدًا ﴿١٠٧﴾

107. waxaad dhahdaa rumeeya Quraanka ama ha rumeynina kuwa la siiyey cilmiga (kuwa fiican) marka lagu akhriyo korkooda waxay u dhacaan wajiga iyagoo Sujuudi,

وَيَقُولُونَ سُبْحَٰنَ رَبِّنَآ إِن كَانَ وَعْدُ رَبِّنَا لَمَفْعُولًا ﴿١٠٨﴾

108. waxayna dhihi waxaa Nasahan Eebahanno ee yabooha Eebahanno waa la fali (Imaan).

وَيَخِرُّونَ لِلْأَذْقَانِ يَبْكُونَ وَيَزِيدُهُمْ خُشُوعًا ۩ ﴿١٠٩﴾

109. waxayna u dhacaan wajiga iyagoo ooyi wuxuuna u kordhiyaa «Quraanku» Khushuuc.

قُلِ ٱدْعُوا۟ ٱللَّهَ أَوِ ٱدْعُوا۟ ٱلرَّحْمَٰنَ ۖ أَيًّا مَّا تَدْعُوا۟ فَلَهُ
ٱلْأَسْمَآءُ ٱلْحُسْنَىٰ ۚ وَلَا تَجْهَرْ بِصَلَاتِكَ
وَلَا تُخَافِتْ بِهَا وَٱبْتَغِ بَيْنَ ذَٰلِكَ سَبِيلًا ﴿١١٠﴾

110. waxaad dhahdaa ama ku barya Ilaah, ama ku barya Raxmaan wax kasta ood ku baridaan wuxuu leeyahay magacyo fiican, ee ha la qaylyina Akhriskaaga (salaadda) hana qarsan ee doon jid u dhexeeya Arrintaas «dhexdhexaad».

وَقُلِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى لَمْ يَتَّخِذْ وَلَدًا وَلَمْ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٌ
فِى ٱلْمُلْكِ وَلَمْ يَكُن لَّهُۥ وَلِىٌّ مِّنَ ٱلذُّلِّ ۖ وَكَبِّرْهُ تَكْبِيرًۢا ﴿١١١﴾

111. waxaadna dhahdaa mahad Eebaa iska leh een Yeelanin Ilmo, una sugnayn shariig xukunkiisu (la wadaage) una sugnayn gargaare dulli dartiis (uga gargaare) ee waynee waynayn (Sharrif).

Gaalase ama ha rumeeyeen Quraanka ama ha beeniyeen,waxaana rumeeyey oo sujuud la dhacay markii lagu akhriyey kuwii fiicnaa ee cilmiga lahaa ee xaqa rumeeyey ee Ehelu Kitaabka ahaa, iyagoo waynayn Eebe rumayn yaboohiisa, Ooyina iyagoo sujuudi oo khushuuci, gaaladiina waxay Nici jireen Magaca Eebe ee Raxmaana markaasaa Eebe u caddeeyey Muslimiinta inay Eebe ku baryikaraan magacyadiisa amaAlle ama Raxmaan illeen Magacyo Badan oo fiican yuu leeyahaye, wuxuuna Nabiga ku faray inuusan ku qaylyin oo kor uqaadin Akhriska Salaadda hoosna u dhigin ee si dhexdhexaada u akhriyo, kuna mahdiyo Eebahaan yeelanin Ilmo, wax la wadaaga xukunkana jirin iyo uga gargaare dulli, una wayneeyo siduu muto,Eebaa wayn oo awood leh, wax la wayneeyana ah, wax cibaado, xukun, caddaalad, sharci, maamul, iyo wanaag la wadaaga ama u kaalmeeyana ma jiro, waxa ka soo hadhay dhammaan waa masaakiin Tabar yar oo Naxariista Eebe hoos joogta sugina. Al-Israa' (107-111).